

Qalin- Maal

Wednesday, 03 February 2010

Maansada Qalin-Maal waxa curiyey oo ay maskaxdiisa ka soo maaxatay, Xassan Cabdi Madar, waxay tilmaamaysaa sida qaranka somaliyeed u bur-buray, iyo dhibaataada qarafadu leedahay , waxay toos u abbaaraysaa dhibaataada haysata ummad Somaliyeed meel kasta oo ay joogaan, waxa ay ka dhiidhiyeesaa Sida Badaha ummadaha bur-buray leeyihiin loogu qubayo, qashinka iyo suntaa hadhaaga waxyaabaha kimikada ah sida NUKLIYEERKA, Xassan Waxa uu u dar-daar warinayaa Qalin layda inay ka dhiidhiyaan dhibaataadaas, oo uu leeyahay Qalinka qaata oo wax ka qora, waxaanu yidhi

Shacbigaygu quduriyo

Qalalaase kama baxo

Dabalaabka qorigiyo

Kama tago qudhgooyada

Qarafadiyo baahida

Kama koro qadoodiga

Caydhiyo qaxootiga

Qaraamaadku waw wehel

Qaabaynta nololeed

Qayrkii ma haybsado

Markii qaaradaha iyo

Dunidii la qaybsaday

Qayrkay dayaxa tegay

Ma qabyaaladii baan

Weli qayb u haystaa

Ma qadoodigii baa

Ma qaxootinimo iyo

Qulub iyo wareer baa

Qorshihii adduunyada

miyaan quus ka joogaa

Ma qabkayga beentiyo

Hawadaan la qooqaa

Isla weyni qaladiyo

Qarafaadhugtii baan

Qiyaas li’l ku noolahay

Kii iskuulka lay qoray

Ma saboolka qalanee

Qombobee dahaadhkiyo

Qolofaystay dheehiyo

Qaadaa ma dhereggiyo

Qatanaha agoonkuu

Qalinkii ku xadayaa

Siyaasiga qudhiisii

Qaangaadhi waayoo

Diradire qabiiliyo

Qoqobaha sokeeyiyo

Bulsho kala qalayniyo

Qolqollada ma dhaafee

Ma qasaarahaygaa

Quddihiyo fandhaalkiyo

Dhiishii la qori jiray

Qalabkaan lahaan jiray

Ma quraarad madhan baa

Dhaqankii qurxoonaa

Qummanaa abyoonaa

Ma ka qaawanow baa

Qalwadii kalluunkiyo

Qoorigii baddaydii

Miyey meel qushaashkiyo

Tahay qumbuladaha iyo

Nukliyeerka lagu qubo

Yaa wanaaggi qoofalay

Yaa qariyey samihii

Yaa xumaan u furay qiil

Inta qaranku sidan yahay

Qoyskii burburan yahay

Qofnimadu habow tahay

Dadnimadu qarriban tahay

Aqoonyahanku quus yahay

Dumarkii qatalan yahay

Qurbajoog silloon yahay

Nolosheenu qaaq tahay

Qallooc iyo maroor tahay

Qormadeenu weligeed

Qabyo beelimaysee

Qalinmaal xerteennii

Qori jiray wanaaggee

Qaladaadka sixi jiray

Idinkaa qiyaasaha

Qawadkiyo dhaliilaha

Ku tilmaama Qalinkee

Bulsho kala qalootiyo

Qaran jabay sidee baa

Dawo loogu qorayaa?